



# Qorshaha Isku xigga Tallaalka Wajiga 1a ee Oregon: Su'aalaha Badanaa La isweydiyo

Dib loo eegay Diseembar 30, 2020

## Illaha

- Qorshaha Isku xigga Tallaalka Wajiga 1a ee Oregon waxaa laga heli karaa websaydka: <https://covidvaccine.oregon.gov/>
- Bogga Isbadelada Tallaalka COVID-19 ee Oregon: <https://govstatus.egov.com/OR-OHA-COVID-19>
- Websaydka tallaalka OHA COVID-19: <http://healthoregon.org/covidvaccine>  
Isbaanish: <http://healthoregon.org/vacunacovid>

## Guud ahaan

### S1: Halkee ayaan ka heli karaa warbixin badan ee ku saabsan tallaalka COVID-19?

J1: Warbixinta la xiriirta badbaadada, isku xigga, diiwaangelinta bixiyaha oo lagu siinayo tallaalka iyo wax badan waxaa laga heli karaa websaydka tallaalka OHA COVID-19 ee <https://covidvaccine.oregon.gov/>.

### S2: Miyaa carruurta laga tallaalayaa COVID-19?

J2: Haatan, maya. Maamulada Isticmaalka Degdega hadeer (EUAs) ee Maamulka Cuntada iyo Daawada (FDA) uma ogollo carruurta ka hooseyso 16 (Pfizer) ama ka hooseeyo 18 (Moderna) in la tallaalo. Mustaqbalka, tallaalka COVID-19 waxaa laga yaabaa in loo ansixiyo isticmaalka ka midka ah carruurta yaryar.

### S3: Sidee ayaan ku ogaadaa goorta iyo halka aan ka heli karo tallaalka?

J3: Maamulka Caafimaadka Oregon waxay la shaqeynayaan Maamulada Caafimaadka Dadweynaha Deegaanka (LPHAs), isbitaalada iyo xubnaha kale ee bulshada ee hormarinta qorshooyinka howlgalka si loo hubiyo in dhammaan

shaqsiyaadka lagu daray Wajiga 1a iyo wajiyada mustaqbalka ee la garanayo meesha iyo goorta la tallaali karo. Iyadoo qorshooyinkaan loo dhameystirayo, waxay lala socodsiiin doonaa dadweynaha. Maamulka tallaalka koowaad wuxuu ka dhacayaa kooxyo gaar ah sida ay ku tilmaameen [Qorshaha Isku xigga ee Tallaalka Wajiga 1a](#) oo waxaa sameeya isbitaalada, adeega caafimaadka degdega (EMS) wakaaladaha, LPHAs, xarumaha kaalinta xirfadeysan iyo jaalalka kale ee u adeegayo dadweynaha Kooxda 1. Haddii hagrid dheeraad ah loo baahdo, fadlan la xiriir qeybta Qorsheynta Tallaalka OHA iyada oo i-meel loo dirayo [COVID19.Vaccine@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.Vaccine@dhsosha.state.or.us).

**S4: Miyay ii suurto galeysaa in lagaa tallaalo meel u dhow bulshada?**

J4: Haa. Qorshooyinka waxaa loo dhisay in lagu hubiyo in siinta tallaalka laga heli karo gobolka oo dhan.

**S5: Miyay Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) qorsheynayaan sameynta tallaalada qasabka ah ee COVID-19?**

J5: Ma jiraan wax qorshooyin ah oo OHA ee u baahan tallaalka COVID-19, laakin OHA waxay si xoogan ugu talineysaa tallaalka badbaadada iyo caafimaadka bulshada oo dhan awgeed.

**S6: Miyaan uga baahannahay shaqaalaheyga inuu saxiixo masuuliyada ka dhaafida ka hor intaysan helin tallaalka COVID-19?**

J6: Ururada waa inay la xiriiraan la taliyahooda sharciga haddii ay qabaan su'aalo ku saabsan masuuliyada iyo siinta tallaalka COVID-19. Waxaa jiro sharciga faderaalka ee loo yaqaan Xeerka PREP kaas oo siiyo difaac sheegashooyinka qasaaraha la xiriiro tallaabooyinka la daboolay, sida tallaalada. Wixii warbixin dheeraad ah, fadlan booqo <https://www.phe.gov/Preparedness/legal/prepact/Pages/default.aspx>.

## Kooxyada mudnaanta Wajiga 1a

**S1: Halkee ayaan ka helaa warbixin ku saabsan sida Oregon ay mudnaanta u siineyso cida heshaa tallaalada COVID-19 ee Wajiga 1a ee Oregon?**

J1: Qorshaha Isku xigga Tallaalka Wajiga 1a ee Oregon waxay hayaan sharaxaado ku saabsan kooxyada u qalma tallaalada Wajiga 1a. Wixii warbixin dheeraad ah, booqo <https://covidvaccine.oregon.gov/>.

**S2: Kawaran haddii aan laygu darin Wajiga 1a ee qorshaha tallaalka?**

J2: Oregon waxay aasaastay [Guddiga La talinta Tallaalka COVID-19 \(VAC\)](#) iyo wakiilada bulshada oo la shaqeyneyso Maamulka Caafimaadka Oregon oo ah cida mudnaanta la siinayo wajiyada mustaqbalka ee qeybinta tallaalka. La soco warbixinta dheeraadka ah.

**S3: Ka waran haddii aan u maleeyo inaan ku jiro Wajiga 1a laakin aanan hubin?**

J3: Fadlan kala xiriir badroonigaaga hagid ku saabsan haddii aad ku jirtid Wajiga 1a ama kala xiriir Maamulka Caafimaadka Oregon [COVID19.Vaccine@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.Vaccine@dhsosha.state.or.us).

**S4: Isbitaalka miyuu u baahanyahay inuu tallaalo shaqaalaha aan isbitaalka u shaqeyn?**

J4: Isbitaalada loogama baahno inay tallaalaan shaqaalaha aan isbitaalka u shaqeyn, sida xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka la aqoonsanyahay ama shaqaalaha EMS. Si kastaba, isbitaalada waxay dooran karaan inay sidaas sameeyaan oo waxaan si xoogan kuugu dhiirogelinayaa sida iskaashiyada ee xiriirinta LPHAs.

**S5: Miyay Maamulada Caafimaadka Dadweynaha Deegaanka (LPHA) ku lug yeelanayaan fududeynta helitaanka tallaalada Wajiga 1a?**

J5: Haa, LPHAs ayaa ka ciyaareyso door muhiim ah ee lagu hubinayo in shaqsiyaadka ku jiro Wajiga 1a lagu tallaalo sida waafaqsan qorshaha isku xigga ee Oregon iyo qorshooyinka deegaankooda. LPHAs ayaa sidoo kale heleyso qoondeynaddooda gaarka ah ee tallaalka.

**S6: Miyaa hoyga caafimaadka maskaxda, hoyga cudurka isticmaalka maandooriyaha, hoyga sunta iyo carruurta lagu daray barnaamijyada dagayaasha caafimaadka dabeecada ee Wajiga 1a?**

J6: Haa, xarumahaan iyo barnaamijyada waxaa lagu daray Wajiga 1a, Kooxda 2. Tani waxaa ku jiro dhammaan dagayaasha buuxiya u qalmida da'da oo tallaalada FDA, iyo dhammaan shaqaalaha daryeelka caafimaad ee la mushaaray ama aan la mushaarin ama shaqaalaha daryeelka tooska ah u adeegayo goobahaan.

**S7: Miyaa dhaqaatiirta ilkaha ku jiraan Kooxda 1 ee Wajiga 1a?**

J7: Dhaqaatiirta ilkaha ee ka shaqeynayo isbitaalada ama goobaha daryeelka degdega waxaa lagu daray Kooxda 1 ee Wajiga 1a, laakin dhaqaatiirta ilkaha ee ka shaqeynayo xafiiska ilkaha kuma jiraan, xittaa haddii ay sameynayaan nidaamyada degdeg ah. Dhaqaatiirta ilkaha ee xafiisyada ilkaha waxaa lagu daray Kooxda 4 ee Wajiga 1a.

**S8: Miyaa shaqaalaha ka shaqeyo xarumaha xabsiga caruurta gobolka ku jiraan Wajiga 1a?**

S8: Haa, shaqaalaha ka shaqeynayo xarumaha xabsiga dhalinyarada gobolka lagu daray Wajiga 1a, Kooxda 2.

**S9: Miyay shaqaalaha ka shaqeynayo Waaxda Adeegyada Aadanaha Oregon (ODHS) guryaha kooxda daryeelka carruurta ku jiraan Wajiga 1a?**

J9: Haa, shaqaalaha ka shaqeynayo guryaha kooxda daryeelka carruurta ODHS waxaa lagu daray Wajiga 1a, Kooxda 2 waxaana loo tixgeliyaa nooc goob daryeel adag.

**S10: Miyay waaladiinta koriyayaasha ee ku daryelayo carruurta haynta gobolka ee guryahooda gaarka ah ku jiraan Wajiga 1a?**

J10: Waxay ku xirantahay. Sida arin guud, goobo aan adkeyn sida guryaha koriyaha shaqsiga laguma darin Wajiga 1a. Si kastaba, waaladiinta korinta ee daryelayo canuga caafimaad ahaan dayacan waxay ku jiraan Wajiga 1a, Kooxda 3.

**S11: Miyay bukaanada isbitaalada daaweynta maskaxda, sida Isbitaalka Gobolka Oregon iyo Isbitaalka Cedar Hills, lagu daray Wajiga 1a? Haddii ay sidaas tahay, kooxdee?**

J11: Haa, bukaanada isbitaalada daaweynta maskaxda waa lagu daray Wajiga 1a. Bukaanada dagan isbitaalka daaweynta maskaxda illaalsan waa in loola dhaqmaa sida la midka ah dagayaasha ku jiro xarumaha kaalisada xirfadeysan iyo daryeelka maskaxda maadaama xaqiiqaha halistooda iyo baaxada joogitaanka ay isku mid yihiin, sidaas darteedna, waxay ku jiraan Wajiga 1a, Kooxda 1.

## Wajiga 1b

**S1: Waa kuma shaqaalaha muhiimka ah ee lagu daray Wajiga 1b?**

J1: Guddiga [Talabixinta Tallaalka](#) (VAC) waxay la shaqeynayaan Maamulka Caafimaadka Oregon si ay u wada abuuraan qorshaha isku xigga oo cida ah in lagu daro Wajiga 1b sida ku saleysan mabaadi'da sinnaanta loo aqoonsaday. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan VAC, oo ay ku jiraan xubnahooda, booqo <https://covidvaccine.oregon.gov> lana soco macluumaad dheeraad ah eek u saabsan Wajiga 1b.

### Fullinta qorshooyinka isku xigga

**S2: Miyaa kooxyada lagu qoray Qorshaha Isku xigga ee Tallaalka Oregon ay tahay in loo raaco si ay ay isugu xigaan?**

J2: Haa. Shaqsiyaadka iyo shirkadaha maamulayo tallaalka COVID-19 waa inay hubiyaan in dhammaan shaqsiyaadka ku jiro Wajiga 1a, Kooxda 1 in la tallaalo ka hor Kooxda 2. Si la mid ah, shaqsiyaadka ku jiro Kooxda 2 waa in la tallaalaa ka hor Kooxda 3 iyo sidaas.

**S3: Ka waran haddii Qorshaha Isku xigga Tallaalka Oregon aan laga raacin bulshadeyda? Yaan la xiriiri karaa?**

J3: Haddii aad aaminsantahay in shaqsiyaadka si aan ku habooneyn loo tallaalay si aan nidaamsaneyn, fadlan kala xiriir Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) [COVID19.Vaccine@dhs.oregon.gov](mailto:COVID19.Vaccine@dhs.oregon.gov) adiga oo siinayo sharaxaado badan ee suurtoogalka ah si markaas OHA ay u dabagasho.

#### **S4: Haddii aan rabo inaan noqdo bixiyaha tallaalka COVID-19, sidee ayaan sidaas u sameeyaa?**

**J4:** Diiwaangelinta la sameeyay ee bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee rabo inay bixiyaan tallaalka COVID-19 waxay bilaabeen noocyada bixiyaha xiggo: isbitaalada, LPHAs iyo Qabiilada Faderaal ahaan loo aqoonsanyahay ee aan ka diiwaangashaneyn dowlada faderaalka si ay u helaan tallaalka COVID-19. Bogga [Illaha Jaalka Daryeelka caafimaadka COVID-19](#) wuxuu leeyahay warbixin ku saabsan iska diiwaangelinta Barnaamijka Tallaalka. Riix sanduuqa “Qorsheynta Tallaalka” ee ka hooseeyo leenka oranjiga wixii sharaxaado dheeraad ah.

#### **Su'aalaha?**

Haddii aad qabtid su'aalo la xiriiro tallaalka COVID-19, fadlan ku soo dir su'aalahaaga mid ka mid ah kuwa xiggo si markaas OHA kuu caawiso.

Tallaalka guud ee COVID-19: [COVID19.Vaccine@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.Vaccine@dhsosha.state.or.us)

Diiwaangelinta bixiyaha tallaalka COVID-19:  
[Vaccine.ProviderEnroll@dhsosha.state.or.us](mailto:Vaccine.ProviderEnroll@dhsosha.state.or.us)

Guddiga La talinta Tallaalka COVID-19: [Covid.vaccineadvisory@dhsosha.state.or.us](mailto:Covid.vaccineadvisory@dhsosha.state.or.us)

#### **Illaha**

Websaydka tallaalka OHA COVID-19: <http://healthoregon.org/covidvaccine>

Websaydka OHA ee tallaalka COVID-19 (Isbaanish):  
<http://healthoregon.org/vacunacovid>

**Helitaanka dukumiintiga:** Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us).